



Kaalmada Dhaqaale ee HealthPartners

Financial Assistance at HealthPartners—Somali

HealthPartners waxay bukaanadeeda siisaa kaalmo dhaqaale. Macluumaadka ku saabsan uqalmitaanka, sida loo codsado, iyo sida kaalmada dhaqaale loo xisaabiyo waxay si buuxdo ugu qeexan yihiin Siyaasadda Kaalmada Dhaqaale ee HealthPartners. Bukaannadu waxay onlaynka ka heli karaan nuqullo bilaash ah oo ah Siyaasadda Kaalmada Dhaqaale iyo foomka codsiga, waxay boosto ku codsan karaan nuqullo bilaash ah oo la mid ah, ama waxay ku codsan karaan iyagoo adeegsanaya koontada onlaynka ah ee bukaanka. Si lagaaga caawiyo nidaamka codsiga ama aad boosto ugu hesho nuqul bilaash ah oo ah Siyaasadda Kaalmada Dhaqaale iyo codsiga, fadlan booqo ama la xirii HealthPartners sida soo socota:

Webseedka: healthpartners.com/FA

Shakhsi ahaan: **Amery Hospital and Clinic**
Adeegyada Dhaqaale ee Bukaanka
265 Griffin Street East
Amery, WI 54001

HealthPartners Clinic - Stillwater
Xafiiska Shaqada (Talaado-Jimco)
1500 Curve Crest Blvd
Stillwater, MN 55082

Hudson Hospital and Clinic
Patient Financial Services
405 Stageline Road
Hudson, WI 54016

Hutchinson Health
Patient Financial Services
1095 MN-15
Hutchinson, MN 55350

Lakeview Hospital
Patient Financial Services
927 West Churchill Street
Stillwater, MN 55082

**Park Nicollet Health Services
(oo uu ku jiro Methodist Hospital)**
Patient Financial Services
3800 Park Nicollet Blvd
St. Louis Park, MN 55416

Olivia Hospital and Clinic
Business Office
100 Healthy Way
Olivia, MN 56277

Regions Hospital
Patient Financial Services
Mail Stop 11102S
640 Jackson St
Saint Paul, MN 55101

Westfields Hospital and Clinic
Patient Financial Services
535 Hospital Road
New Richmond, WI 54017

Taleefanka:	715-268-8000	Amery Hospital and Clinic
	651-439-6528	HealthPartners Clinic - Stillwater
	651-265-1999	HealthPartners Medical Group Clinics
	715-531-6200	Hudson Hospital and Clinic
	320-484-4493	Hutchinson Health
	651-430-8709	Lakeview Homecare & Hospice
	651-430-4533	Lakeview Hospital
	952-993-7672	Adeegyada Caafimaadka ee Park Nicollet, oo uu ku jiro Methodist Hospital
	320-523-8300	Olivia Hospital and Clinic
	651-254-4791	Regions Hospital
	952-993-5463	TRIA Orthopaedic Centers and Clinics
	715-243-2600	Westfields Hospital and Clinic

UQALMITAANKA

HealthPartners waxay xisaabisaa kaalmada dhaqaale iyadoo ku salaynaysa dakhliga qoysaska bukaanada oo loo barbardhigay waxa loo yaqaano Khadka Saboolnimada Federaalka (FPL). Bukaanada dakhliga qoyskooda uu ka yar yahay 200% ee khadka FPL waxay helaan qiimo dhimista ugu badan. Inta u dhaxaysa 201% iyo 400% ee khadka FPL, heerka kaalmada dhaqaale wuxuu ku xirnaan doonaa dakhliga soo gala qoyska, tirada qoyska, iyo wadarta kharashaadka isbitaalka ee daryeelka. Fadlan u tixraac Siyaasadda Kaalmada Dhaqaale ee HealthPartners wixi macluumaad dheeraad ah. Haddii bukaanu uu gurmada degdeg ah ama daryeel kale oo caafimaad ahaan lagama maarmaan ah uu ka helay HealthPartners uuna u qalmo kaalmo dhaqaale, HealthPartners kuma soo dallici doonto wax ka badan qadarka guud ahaan lagu dallaco bukaanada leh daboolista caymiska caafimaadka.

SIDA LOO CODSADO

Si loo codsado kaalmo dhaqaale, bukaanadu waa inay buuxiyaan foom codsi ah una celiyaan HealthPartners iyagoo ugu diraya koontadooda onlaynka ah, shakhsi ahaan, boosto, ama fakis iyagoo adeegsanaya xogta xiriirka ee xagga kore ku qoran. Bukaanada waxaa la waydiin doonaa inay bixiyaan dukumiinti caddaynaya dakhliga (sida canshuur celinta dakhliga ee federaalka), dukumiintiyada caddaynaya hantida sida sahlan lacag caddaan ah loogu rogi karo¹ (sida koontooyinka keydsashada/koontooyinka maalinlaha loo isticmaalo, saamiyada, curaarta) iyo xog ku saabsan daboolista caymiska caafimaadka ee hadda ama suurtagalka ah (sida Medicaid, Medicare, ama caymis gaar ah). La-taliyeyaasha Dhaqaale waxaa taleefan loogala xiriiri karaa taleefan lambarada soo socda:

Amery Hospital and Clinic: 715-268-8000

Hudson Hospital and Clinic: 715-531-6200

Hutchinson Health: 320-484-4493

Lakeview Hospital: 651-430-4533

Methodist Hospital: 952-993-5586

Olivia Hospital and Clinic: 320-523-8300

Regions Hospital: 651-254-0842

Westfields Hospital and Clinic: 715-243-2600

U tixraac Siyaasadda Kaalmada Dhaqaale ee HealthPartners wixi xog dheeraad ah.

TARJUMAADAHA

Tarjumaadaha Siyaasadda Kaalmada Dhaqaale ee HealthPartners, foomka codsiga, iyo soo koobidda luuqad bayaansan waxaa loo heli karaa luuqado gaar ah oo ku salaysan bulshooyinka ay u adeegto HealthPartners. Si aad u hesho nuqullo bilaash ah oo turjuman, fadlan booqo webseedka HealthPartners ama codso nuqullo adigoo adeegsanaya xogta xiriirka ee xagga kore ku qoran.

¹ Xaqiijinta hantida iyo dib-u-eegista **laguma** dabaqo bukaanada daryeelka ka helaya Amery Regional Medical Center iyo Hutchinson Health.